

Aqoonta ayaa ah dab-damiyaha ugu fiican



HOME SAFETY
CHALLENGE



Lambarada telefoonada degdegga

Degdegga 911

Waaxda Dab-damiska (Aan Ahayn Degdeg) _____

Sharci Fulinta (Aan Ahayn Degdeg) _____

Dhakhtar _____

Dhakhtarka Caruurta _____

Cisbitaal _____

Dhakhtarka Ilkaha _____

Dhakhtarka Xayawaanka _____

Shirkadda Gaasta _____

Shirkadda Korontada _____

Tuubiiste/Qasabadle _____

Deris _____

Xubin Qoys _____


Khadka Gargaarka Sun Xayawaan 1-800-213-6680

Xakameynta Sunta 1-800-222-1222

Lambarada Teleefonada Degdegga	1
Khataraha iyo waxa aad sameyn kartid si aad u yareysid halisyada	2
Talaabooyinka kale ee la qaado si loo helo ammaan sii badan	8
Waxa la sameeyo marka uu dab jiro.....	11
Talo gaar ah oo loogu talogalay waalidka iyo daryeel bixiyeyaasha.....	12
Talo gaar ah oo loogu talogalay kireysteyaasha.....	14
Talo gaar ah oo loogu talogalay waayeelka sii weyn	15
Talo gaar ah oo loogu talogalay mulkiileyaasha guryaha warshad sameysay.....	16
Qalabka ammaanka iyo tababarka.....	20

Khataraha

Khataraha iyo waxa aad sameyn
kartid si aad u yareysid halisyada



**Ka fikir gurigaaga oo uu ka
buuxsamay qiiq madow oo badan,
iyo olol burburinaya alaabtaada oo
kaa horjoogsaday inaad baxsatid.
Hadda oo aad ka fikirtid oo aad
talaabo qaadir waxay ka hortagi
kartaa in arrintaasi kugu dhacdo.**

Sigaar cabista

Sida uu sheegay Isbahaysiga ka Badbaadista Dabka ee Qaran (National Fire Protection Association) (NFPA), alaabooinka sigaar cabista ayaa ah sababta koowaad ee keenta geerida ka timaada dab gudaha Maraykanka. Waa inaad ka warqabtid halisyada dabka ee la xidhiidha sigaar cabista.


- Haddii aad sigaar cabtid, isticmaal kaliya sigaar waafaqsan heerka dabka (fire-standard).
- Haddii aad sigaar cabtid, ku cab dibadda.
- Sigaarka ha ku tuurin dhirta, dhirta ku jirta weel ama dhulka la qaabeeeyay ama la qurxiyay, cawska “peat moss”, cawska qallalay, caleenta qoyday, caleenta, iyo waxyaabaha kale ee si fudud dab u qabsan kara.
- Isticmaal aash-taray ama weelka daminta sigaarka oo leh qoto dheer oo adag. Marna waxyaabaha sigaar cabista toos ha ugu shubin haanta qashinka. Dabada sigaarka iyo dambaska ku rid biyo ama ciid.
- Badi dabka geerida leh waxa uu dhaca marka dadka ay hurdo-hurdo hayso, ay qaateen dawo ama sakhraansan yihiin.
- Marna sigaar ha ku cabin sariirta.
- Marna ha isticmaalin meesha lagu isticmaalayo oksijiinta caafimaadka.
- Ha hor inta aanad tagin sariirta, ka fiiri dabada sigaarka oo qiiqaysa meesha ay dad ku cabeen sigaar gudaha gurigaaga.

Shumaca

- Shumacyada ku shaqeeya baytari ee aan lahayn olol ayaa ah doorashada ugu ammaan badan.
- Marka kasta toosh ama karbuuno – ma aha shumac – u isticmaal iftiinka degdegga.
- Iska ilaalii inaad shumacyo ku isticmaasho agagaarka caruurta iyo xayawaanka. Waxa badanaa soo jiita ololka.
- Haddii aad dooratid inaad isticmaashid shumacyo, dhex gali hayeyaa shumac oo adag oo xoog leh oo aan guban doonin.
- Waa in shumacyadu ugu yaraan u jiraan saddex fit wax kasta oo guban kara.
- Dami shumacyada marka aad ka tagtid qol ama tagtid sariirta.
- Marna shumacyo ha ku isticmaalin qolka hurdada.



Khataraha



Karinta

- Markasta joog jikada ama madbakha marka aad cunto ku karinaysid dusha shoolada. Sababta dabka ee koowaad gudaha jikada waa karinta aan lala joegin.
- Samee aag ammaan oo ah saddex fiit oo ku wareegsan shooladaada iyo giriilkaaga, adiga oo dhammaan caruurta yaryar iyo xayawaanka guriga ka fogeynaya ugu yaraan saddex fiit marka aad wax karinaysid.
- Dusha shoolada ka dhig nadiif. Wax kasta oo guban kara – oo ay ku jiraan gacmo-galisyada, sanduuqyada cuntada, tuwaalada ama shukumaanada – waa inay ugu yaraan u jiraan saddex fiit dusha shoolada iyo foornada ama oofenka.
- Dhammaan gacmaha dheryaha u jeedi dhinac si looga ilaaliyo inay hoos u dhacaan.
- Nadiifi naqas-saarka ka sareeya shoolada hal mar bishii si looga hortago in dufan meesha ku ururo.
- Xidho dhar kugu dhegan ama gacmo gaaban marka aad wax karinaysid.
- Haddii uu dab ka bilaabmo daawe saaran shoolada, ha qaadin daawaha ama ha ku shubin biyo! Si taxadir leh ugu riix dabool dusha daawaha, bakhtii shoolada, oo wac waaxda dab-damiska.
- Biyaha iyo saliiddu isku qasmaan. Marna biyo ha ku shubin dab dufan. Waxay keenaysaa in saliiddu qaraxdo oo dhakhsu dabku ugu fido qolka.


Kululeeyeyaasha Aagga (Space Heaters)

- Markasta kululeeyeyaasha aagga dhig sagxad aan dhaqaaq lahayn oo ugu yaraan saddex fiit u jirta wax kasta oo guban kara.
- Waa in kululeeye aag uu leeyahay iswijiil isla markiiba damin doona kululeeyaha haddii uu dhinac u dhaco ama uu aad u kululaado.

Khataraha iyo waxa aad sameyn kartid si aad u yareysid halisyada

Goob Dab Shidis

- Goobaha dabka lagu shido iyo shoolada qoriga ku gub kaliya qoryo ama xaabo mudo meel yaalay – ma aha qashin ama waraaqo.
- Waa in qiiq-saarka uu fiiriyo oo uu nadiifijo xirfadle ugu yaraan hal mar sannadkii.
- Dambaska ku rid weel bir ah oo aan hawadu ka soo baxayn ilaa uu ka qaboobo. Dambas aan si fican loo meeleyn ayaa dab sababay maalmo ka dib.
- Farnijarku ha u jiraan saddex fiit goobta dabka.



Foornada

- Foornada kululaynta sannad kasta ha fiiriyo xirfadle, ama ha la raaco sida uu ku talinayo soo-sameeyuhu.
- Beddel shaandhooyinka ama filtrada adiga oo raacaya sida uu ku talinayo soo-sameeyuhu.

Koronto

- Xadhkaha dheereynta looguma talogalin inay beddelaan waayirada ama fillooyinka rasmiga ah. Isitmalaal qalabka ka badbaadista butaaca koronto (surge protectors) marka dhawr god koronto loo baahan yahay.
- Korontada ka saar qalabka (sida kidhliga/kirliga kafeega, towstarada) marka aan la isticmaalaynin.
- Beddel xadhkaha koronada ee waxyeeloobay.
- Nalalka “halogen” waxay ku shaqeeyaan heerkul sareeya, sidaa daraadeed waxay keenayaan halisyo dab iyo gubasho. Waa in taxadir dheeraad ah loo yeesho isticmaalkooda.
- Raac taloooyinka waatyada ee loogu talogalay qalab iftiin oo kasta.
- Ma aha in xadhkaha korontada la hoos galiyo qadiifadaha ama roogaga ama lagu gudbo jidka albaabka.
- Waa in dhammaan godadka korontada iyo iswiijyada nalka ay leeyihiin daboolo.
- Waa in sanduuqyada fiyuusyada la gaadhi karo oo si cad qoraal ugu yaalo. Waa in albaabka birta ah uu xidhan yahay.
- Waa in dhammaan godadka korontada ee biyo u dhow ay ku badbaadsan yihiin GFCI.

Khataraha



Dibadda iyo gareeshka

- Waxyaabaha si fudud u gubta (burbur, qoryo, caleen, qashin, iwm.) ka fogee guriga.
- Waa in godadka korontada ee dibadda ay leeyihii daboolada godadka korontada ee dibadda.
- Iska ilaali ururidda kaarbon monoksaydh; ha daarin gaadhiga ilaa albaabka geerashku si buuxda u furan yahay. Marna gaadhiga oo shidan ha kaga tagin geerashka.
- Hooreyaasha ololi kara ha ku ku jiraan weel ammaan ah gudaha kabadh/aramaajo bir ah oo leh albaabo— oo ka fog goob kulayl leh iyo irridaha. Injiinada ama matoorada shidaal ku shub adiga oo jooga hawada dibadda.
- Waa in giriilada ku shaqeeya “propane”/dhuxul ay yaalaan dibadda oo ah sagxad aan gubanaynin. Ma ah in giriilada lagu isticmaalo hoosta saqaf waana inay ugu yaraan lix fit u jiraan guriga marka la isticmaalayo.
- Waa in aagaga lagu nool yahay iyo geerashka ku dhegan uu kala soocayo albaab adag ama alaab bir ah oo aan dabka u nuglayn.
- Derbiga qallalan (drywall) waxa uu leeyahay badbaado dab oo xad leh. U hubso in aanay jirin meelo daloola oo ku yaala derbiga qallalan ee kala soocaya goobta lagu nool yahay iyo geerash ku dhegan.
- U hubso dib u noqoshada ammaanka loogu talogalay ee albaabka geerashka uu shaqeynayo oo si haboon u rakiban yahay.
- Waa in lambarada gurigu ay yihiin midab ka duwan ka guriga oo ay yihiin kuwo waaweyn oo laga akhriyi karo jidka. Ka fiirso inaad isticmaashid lambaro iftiinka soo celinaya iyo inaad ku iftiimisid nal.
- Waa in dhirta la gaagaabiyo si aanay u taaban ama u dul joogin saqafka si looga hortago fidista dab.

Khataraha iyo waxa aad sameyn kartid si aad u yareysid halisyada

Fallal Dambi

- Badi fallalka dambi waxa sababa fursad. Tuugta ha siin fursad fudud oo ay ku xadaan maalkaaga. Rakib oo joogto ka dhig iftiin dibadda ah oo haboon, oo ay ku jiraan qalabka dareema dhaqaaqa oo ah xagga hore iyo xagga dambe ee guriga.
- Dhammaan albaabada dibadda, oo uu ku jiro albaabka geerashka ee laga sii galo guriga, waa inuu ku rakiban yahay quful adag (deadbolt locks).
- Waa in quraarad ama qarsho aan burburayn lagu rakibo dhammaan albaabada iyo dhinacyada ku xiga albaabada.
- Waa in dhammaan daaqadaha geerashku ay daddan yihiin.
- Dhammaan dhirta/geedaha ku yaala daaqadaha hortooda waa in la gaagaabiyo si loo baabi'iyo meelo lagu gabado.
- Waa in dhammaan daaqadaha lagu rakibo handaraabyo ama qufuloo oo ay xidhan yihiin.
- Albaabada silbada waa in lagu adkeeyo qalab qufulis. Dheeri ahaan, xanibaad gali jidka ama godka uu ka silbado ama dhaqdhaqaaqo albaabku.
- Nalalka gudaha ku rakib saacado daara oo damiya oo ku aadi inay daaraan nalalka marka aan qof joogin guriga.
- Markasta quful albaabada baabuurkaaga. Kuma xidhna in baabuurku yaalo guriga hortiisa, geerashka, ama jidka. Alaabta qaaliga ah ka saar baabuurka.
- Hubka iyo rasaasta waa in la dhigo meel qufulan oo gooni loo kala dhigo.
- Qalabkaaga lagu furo albaabka geerashka ha dhigin meel laga arki karo.



Helitaanka Ammaan


Talaabooyinka kale ee la qaado si loo helo ammaan sii badan



Ka-hortagga ayaa ah habka ugu fican ee lagu yareeyo suurtogalka dab ka kaca gurigaaga. Wuxuu jira dhawr wax oo aad qaban kartid si aad u ilaalisid ammaanka qoyskaaga, haddii uu dab kaco.

Biyo firdhiyeyaasha dabka


- Biyo firdhiyeyaasha dabka ee guriga waxay la shaqeeyaan qalabka digniinta qiiqa si loo badbaadiyo nafta dadka. Macluumaadka NFPA waxay muujinayaan in biyo firdhiyeyaasha dabka ee guriga ay yareyn karaan halista dhimasho ee dabka guriga tiro ah ilaa 80%.
- Biyo firdhiyeyaashu waxay badbaadiyaan nafta iyo maalka iyaga oo dabka ka dhigaya mid yar. Sababta oo ah habka biyo firdhinta oo dhakhso u jawaaba, waxa uu si weyn u yareyn karaa kulka, ololka, iyo qiiqa uu abuuro dabku, taasoo qoyskaaga siinaysa wakhti dheeraad ah oo ay ku baxsadaan.
- Biyo firdhiyeyaasha dabka waxa lagu rakibi karaa guryaha cusub ama kuwa hore u jiray. Haddii aad dib u habeynaysid ama dhisaysid guri, ku rakib habka biyo firdhinta dabka.
- Waxa si gaar ah u sii ah muhiim in habka biyo firdhinta dabka lagu rakibo guryaha ay joogaan dadka laga yaabo in aanay awoodin inay soo baxaan gargaar la'aan, sida dadka leh naafiooyin, caruurta yaryar, ama waayeelka.
- Qandaraasle u qalma ha kuu rakibo habkaaga biyo firdhinta dabka. Hagaaji adiga oo raacaya xeerarka dabka ee degmada.



Sii Badan


Rakib qalabka digniinta qiiqa

- Qalabka digniinta ee shaqeynaya waxa uu badbaadiyaa nafta dadka, isaga oo halista in lagu dhinto dabka guriga ka dhiga kala badh. Waa in qalabka digniinta qiiqa lagu rakibo guri kasta oo la dayactiro.
- Qalabka digniinta qiiqu waxa uu dareemaa qiiqa waxana uu bixiyaa digniin inta lagu jiro heerarka hore ee dabka. Taasi waxay ku siinaysaa wakhti aad ku baxsatid.
- Qalabka digniinta qiiqa ku rakib heer kasta oo ah gurigaaga, dibadda qol hurdo kasta iyo gudaha qol hurdo kasta.
- Marka aad beddelaysid qalab digniin qiiq oo isku xidhan, dhammantood ku beddel isku nooc.
- Qalabka digniinta qiiqa si joogto ah siigada uga qaad ama u mari faakiyyumka. Raac fariimaha soo-sameeyaha marka aad nadiifinaysid.
- Qalabka digniinta qiiqa waa in bil kasta la tijaabiyo iyada oo la riixayo barta “TEST” (TIJAABI).
- Beddel baytariga ugu yaraan mar sannadkii (haddii aanad haysan baytariyo ah “lithium” oo jiraya 10 sanno). Hab fudud oo lagu xusuusto in la beddelo baytariyada waa marka aad beddelaysid wakhtiga saacadahaaga marka saacadda dib loo dhigay ama hore loo dhigay.
- Beddel qalabka digniinta qiiqa 10-kii sannadood kasta adiga oo raacaya fariimaha soo-sameeyaha.



Helitaanka Ammaan

Talaabooyinka kale ee la qaado si loo helo ammaan sii badan



Talaabooyinka kale ee la qaado si loo helo ammaan sii badan

1. Qaado dhawr daqiqadood oo aad kaga fikirtid sida aad dibadda ugu bixi lahayd haddii uu jiro dab.
2. Ku tababarta qorshaha baxsiga adiga iyo dhammaan dadka kula degan guriga ugu yaraan laba jeer sannadkii.
3. Go'aami goob lagu kulmo oo ah xagga hore ee guriga oo u hubso in dhammaan qoysku yaqaano in meeshaas lagu kulmo haddii dab kaco.
4. U hubso in qof kasta oo jooga guriga uu ku toosayo codka qalabka digniinta qiiqa. Waxa laga yaabaa in caruurta, waayeelka, iyo dadka qaba naafooyin ay u baahan yihiin gargaar si ay u toosaan oo u dibadda ugu baxaan. U hubso in qof kasta uu gargaari doono iyaga.
5. Go'aami laba siyaabood oo lagaga baxo qol hurdo kasta.
6. Seexo iyada oo albaabku kuu xidhan yahay. Haddii dab dhaco, albaabka xidhan waxa uu celinaya qiiqa iyo kulka taasoo ku siinaysa wakhti aad ku gaadhid irriddaada ama jidkaaga baxsiga ee labaad.
7. Gacanta ku dareen albaabka ka hor inta aanad u bixin inta u dhexeysa qolalka. Haddii albaabku kulul yahay, isticmaal irridda baxsiga ee labaad. Haddii uu qabow yahay, hoos u isu dhig oo si tartiib ah fur albaabka. Haddii ay ammaan tahay, dibadda u bax oo tag goobtaadii kulanka.
8. Jidkaaga baxsiga banee oo ka dhig mid aan xanibnayn. Iska ilaali alaabooyinka ku xanibaya ama ku dabraya. Haddii aanad alaab isticmaalin sannadkii hore, ka firso inaad qof siisid ama tuurtid.

Sii Badan

Waxa la sameeyo haddii

uu jiro dab ... Dibadda u Bax

Joog Dibadda

WAC 9-1-1


- Is deji oo dhakhso wax u qabo! Ha daahin—dibadda u bax! Wakhti ha ku lumin urursiga alaaboojin.
- Qorshahaaga ka baxsiga dabka hawlgali.
- “Hoos isu dhig” sababta oo ah hawada xagga hoose oo ah mid sii saafisan oo sii qabow.
- Xusuuso inaad isticmaashid jarjanjarooyinka. Marna ha isticmaalin wiishashka ama elifaytarada marka dab jiro!
- Dib ha ugu laaban guriga. Dad badan ayaa dhinta iyaga oo isku dayaya inay badbaadiyaan xayawaan guri ama soo urursadaan alaab qaali ah. Dibadda ka wac 9-1-1 oo joog goobtaada kulanka ilaa waaxda dab-damisku ka timaado.
- Haddii ka bixidda daaqad aanay ahayn doorasho aad sameyn kartid, albaabku ha kuu xidhnaado. Gali busteyaal ama go’yaal xagga hoose ee albaabka si aad u joojisid qiiqa soo galaya. Xidh marinada kulaylinta/qaboojinta hawada. Daar nalka. Fur daaqad si u soo jeedisid gargaar. Wac 9-1-1.

Haddii dharkaaga uu qabsado dab

- **JOOGSO. ISKU TUUR** dhulka. **IS ROG** si aad u damisid dabka.
- Wajigaaga ku dabool gacmahaaga si aad dabka uga ilaalisid sinkaaga iyo indhahaaga.
- Isticmaal biyo qabow si aad u daweysid gubashada. Gubashooyinka ku dabool maro nadiif ah oo qallalan.
- Gargaar dhakhtar u raadso gubashooyinka daran.



Talo



Talo gaar ah oo loogu talogalay waalidka iyo daryeel bixiyeyaasha

Dhaawaca aan kas ahayn ayaa ah sababta koowaad ee dhimashada caruurta. Waalidka iyo daryeel bixiyeyaashu waxay mas'uul ka yihiin inay qaadaan talaabooyinka loo baahan yahay inay guryahooda caruurta ugu dhigaan ammaan intii suurtogal ah.

Gurigaaga ammaan uga dhig caruurta

- Ku rakib irrido dusha iyo hoosta jaranjarooyinka guryaha ay joogaan caruur si looga hortago dhicitaanada.
- Ka-hortagga dhicitaanka ku rakib daaqadaha ku yaala daqaba sare ee guriga si looga hortago in caruurta ka soo dhacaan daaqada.
- Cuntooyinka iyo cabitaanada kulul ka fogee qarka miisaska si looga hortago gubashooyinka.
- Markasta hubi heerkulka biyaha ka hor inta aanad ilmaha ku ridin qubeyska. Ka firso inaad qalabka lidka biyo gubashada (anti-scald) (oo yareeya qulqulka biyaha ilaa dhibic-dhibic marka heerkulka biyuhu u dhawaado 120 darajo Fahrenhayt) ku rakibtid tuubada ama qasabada biyaha iyo madaxyada qubeyska. Termostaatka biyo kululeeyahaaga ku aadi 120 darajo Fahrenhayt ama ka yar.
- Daboolo gali godadka korontada si aan ilmuhi alaab u galin.
- Dhammaan dawooyinka iyo alaaboooyinka nadiifinta meel ha ku qufulnaadaan.
- Haddii caruur joogto guriga, ha ka bixin qolka qubeyska iyada oo weelka qubeyska ay ka buuxsamaan biyo.

Gaar ah


Caruurta bar halisyada dabka

Waa muhiim in laga warqabo in caruurtu dab ku kicin karaan daqiqado. Caruurta badanaa waxa soo jiita ololka, shumaca, taraqa/kabriidka, iyo shideyaasha sigaarka. Bar caruurgaada in dabku yahay qalab qof weyn, ee aanuu ahayn alaabta ciyaarta ee caruurta.

- Sigaarka, taraqa/kabriidka, shideyaasha sigaarka, iyo alaabta kale ee sigaar cabista ku hayso khaanad qufulan oo ka fog tiigsida (iyo aragga) caruurta.
- Caruurta ku dhiirigali inay qof weyn u sheegaan haddii ay helaan taraq/kabriid ama shideyaal sigaar.
- Caruurta bar in aanay taaban taraq/kabriid ama shideyaasha sigaarka.
- Haddii aad og tahay caruur laga yaabo inay shidayaan dab, la xidhiidh waaxda dab-damiska si aad u heshid gargaar.
- Bar caruurta inay u baahan yhiin inay ka fogaan shooladaha iyo illaha kale ee kulka.
- Samee tusaale fiican oo ah sida ammaanka leh ee loo dhaqmo marka la joogo agagaarka dabka sida dab weyn oo la shiday, giriilada dubista, goobaha dabka lagu shido, iyo dabka miyiga.
- Si joogto ah ugu tababarta qorshahaaga ka baxsiga dabka si caruurtu u yaqaanaan sida dibadda loogu baxo haddii uu dab jiro.



Talo



Talo gaar ah oo loogu talogalay kireysteyaasha

Guri aad kireysatay machaheedu ma aha inaad iska ilowdid ka-hortagga dabka. U hubso inaad fahamtid oo ku tababaratiid jidkaaga baxsiga. La shaqeeye mulkiilaha guriga si aad hubisid in halisyada dabka ee suurtogalka ah la yareeyay.

- Waa in mulkiilaha guriga uu ku rakibo qalabka digniinta qiiqa oo shaqeynaya. Hase yeesh, adiga ayaa ka mas'uul ah inaad si joogto ah u hagaajisid oo aad soo sheegtid wixii ah qalab digniin qiiq ee aan shaqeynaynin.
- Qorshee oo ku tababaro qorshahaaga ka baxsiga dabka. Waa inaad taqaanid inta albaab ee kaa xigta jidkaaga baxsiga. Ha isticmaalin wiishka ama elifaytarka.
- Iska ilaali inaad sigaar ku cabtid oo giriilka dubista ku isticmaashid balkooniga ama barandaha abaarmaanka.

Gaar ah

Talo gaar ah oo loogu talogalay waayeelka sii weyn


Waayeelka sii weyn waxay halis gaar ah u yihiin dhaawac culus iyo geeri ka soo gaadha dabka iyo dhicitaanada. Waxa aad u baahan tahay inaad ka digtoonaatid halisyada, oo aad qaadid taxadirada lagama-maarmaanka ah ee si aad ammaan u ahaatid. Xidhiidh joogto ah oo aad la yeelatid xubnaha qoyska, deriska, iyo/ama saaxiibada waxay qayb muhiim ah ka yahay sidii aad ammaan u ahaan lahayd.

Ammaanka dhicitaanka

- Dhicitaanka ah gudaha guriga ayaa si gaar ah halis ugu ah waayeelka sii weyn. Samee taxadiro si loo yareeyo halista dhicitaanka.
- Bixiyahaaga daryeel caafimaad ha fiiriyo dawoooyinkaaga iyo saameynnada ama waxyeelooyinka suurtogalka ah ee ka iman kara.
- Aragga indhahaaga ha la baadho.
- Bilaw barnaamij jimicsi oo joogto ah si aad xoog iyo dabacsanaan u lahaatid.
- Jaranjarooyinka banee oo ka ilaali baakooyinka, sanduuqyada, iyo qashinka. Alaabooyinka looga tago jaranjarta waxay keenayaan halis dhicitaan.
- Saar qadiifadaha ama rooggaga yaryar ama isticmaal dhejiska xejiya rooggaa ee laba dhinac leh (double-sided tape) ama khadka xejiya rooggaa (rug liner) si aan rooggoo u siiban.
- Alaabooyinka inta badan la isticmaalo ku hayso khaanado aad si fudud u gaadhi kartid adiga oo aan isticmaalin salaan/jaranjar yar.
- Rakibo biraha la qabsado ee qubeyska iyo musquusha.
- Darmooyinka aan siibayan dhigo musquusha iyo dhulka qubeyska.
- U hubso in barafka furfuran iyo barafka adag laga qaaday jihadka socodka.
- Hagaaji nalalka ama iftiinka gurigaaga.
- Dhammaan jaranjarooyinka ku rakib gacmo-qabsiyo iyo iftiin haboon.



Talo



Talo gaar ah oo loogu talogalay dadka ku nool guryaha warshad sameysay

Guryaha warshad sameysay, gaar ahaan kuwa gabooabay, waxay yeelan karaan halisyo ah xagga ammaanka. U hubso inaad raacdid tilmaamaha ammaanka ee loogu talogalay noocyada kale ee guryaha, sida adiga oo yeelanaya qalabka digniinta qiiqa oo shaqeynaya, adiga oo la soconaya karinta, iyo hirgalinta xeerka saddex fiit oo ah agagaarka illaha kulka.

Duubka kulaylinta tuubooyinka (Heat tape)

Duubka kulaylinta tuubooyinka waa duub si xirfadle leh loogu duubay tuubooyinka biyaha soo galaya gurigaaga. Si duubka kulaylinta looga ilaaliyo inuu barafoobo xilliga jiilaalka, qof xirfadle ah ha kuu hubiyo dayr kasta ka hor inta aan duubka la galin godka korontada. Ka dib marka la dhaafu suurtogalka baraf ee ugu dambeeya, ka saar godka korontada si aad u madhxisid korontada. Qarka ku wareegsan dibadda guriga (skirting) ee dhulka la siman ha ahaado mid aan burbur lahayn si xayawaanka yaryar looga ilaaliyo inay hoos galaan guriga oo ruugaan duubka kulaylinta. Haddii duubku xumaado oo tuubooyinku barafoobaan, la xidhiidh xirfadle.

Gaar ah

Macluumaad kale oo nafta badbaadinaya


Ka-hortagga iyo helitaanka noocyo kala duwan oo ah qalab digniin, aalado, iyo habraacyada degdegga ayaa kordhin kara suurtogalka noolaansho ee qoyskaaga.

Qalabka digniinta kaarbon monoksaydh

- Kaarbon monoksaydh (CO) waa neef ama naqas aan lahayn ur iyo midab oo sun ah. Way ku dili kartaa ka hor inta aanad fahmin inay ku jirto gurigaaga. Boqolaal qof ayaa u dhinta kaarbon monoksaydh sannad kasta.
- CO waxay ka iman kartaa qalabka ku shaqeeya gaas ama neefta la shito, giriilada lagu shido dhuxul, goobaha dabka iyo shooladaha lagu gubayo qoryo ama xaabo, iyo gaadiidka matoor leh.
- Astaamaha sumowga CO waxa ka mid ah madax-xanuun, lallabo/yalaalugo, iyo hurdo-hurdo.
- Qalabka digniinta kaarbon monoksaydh ku rakib meel 10 fit u jirta aagaga hurdada. Raac fariimaha soo-sameeyaha xagga meeleynta iyo dhererka meesha lagu rakibayo.
- Isticmaal qalabka digniinta kaarboon monoksaydh ee ah dhigital ee korontada la galiyo ee isticmaalaya baytariyo haddii korontadu go'do.
- Iska ilaali inaad iibsatid qalab digniin oo isugu jira digniinta kaarbon monoksaydh iyo qiiqa.
- Tijaabi qalabka digniinta CO hal mar bishii.
- Beddel qalabkaaga digniinta 5-7 sanno kasta (taariikhdu dhabarka ayay ku taalaa) ama raac fariimaha soo-sameeyaha. Dareemeyaasha ku yaala qalabka digniinta CO waxay leeyihiin jiritaan xadeysan.



Talo



Waa maxay talaabooyinka aan qaadi karo haddii qalabkayga digniinta CO uu dhawaaqo ama qayliyo?

Haddii aan qof dareemin jirro:

- Dami qalabka digniinta.
- Dami dhammaan qalabka iyo illaha gubashada.
- Wac xirfadle aqoon leh iyo/ama shirkadda gaasta si loo baadho meesha uu ka yimid ururidda suurtogal ah ee CO.


Haddii dadku ay dareemeyaan astaamo u eg kuwa hargabka:

- Isla markiiba ka baxa guriga.
- Wac 9-1-1.
- Joog goob leh hawo cusub ilaa shaqaalaha gurmadku ka yimaadaan si ay kuu gargaaraan.

Gaar ah


Qalabka Dab-damiska

- Ka fiirso inaad gurigaaga u soo iibisid dab-damisyo ah **5 lb. ABC multi-purpose**.
- Dab-damisyada dhig meel u dhow irridaha bixista oo ah jikada iyo geerashka.
- Fiiri si aad u hubsatid in saacaddisu ku jirto “cagaar” taasoo sheegaysa inuu leeyahay cadaadis. Qof xirfadle ahi ha kuu firiyo oo ha kuu cabeyo qalabka dab-damiska lixdii sannadood ee kasta.
- Isticmaal habka PASS (Riix biinka (Pull), ku aadi salka dabka (Aim), tuuji (Squeeze) gacanta, oo dhinac dhinac u dhaqaaji (Sweep)). Markasta dhabarkaaga ha ahaado jid bixid si aanad u xanibmin, oo u hubso in la wacay 9-1-1 ka hor inta aanad isku dayin daminta dabka.



Qalabka

Qalabka ammaanka iyo tababarka



Baadhistaa Raadon (Radon)

- Neefta ama naqaska raadon ayaa ah sababta koowaad ee kaansar ku rida dadka aan sigaar cabin.
- Wasaaradda Caafimaadka ee Minnesota waxay ku talinaysaa inaad gurigaaga ka baadhid jiritaanka raadon.
- Qalabka baadhitaanka raadon ka soo iibso dukaanka qalabka dhismaha ee xaafaddaada, ama internetka.
- Si taxadir leh u akhri oo u raac fariimaha qalabka baadhitaanka raadon.
- Haddii naatijada baadhitaanku muujinayo heerar sareeya oo ah raadon, la xidhiidh Wasaaradda Caafimaadka ee Minnesota si laguugu gudbiyo gargaar.

Tababarka dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabka (CPR)/Gargaarka Koowaad

- Garashada CPR iyo Gargaarka Koowaad waxay awoodaa badbaadin oo way badbaadisaa nafta.
- Qaado kooras ah CPR si aad u baratid farsamadan nafta badbaadisa.
- La xidhiidh waaxdaada dabka, Laanqayrta Cas, Isbahaysiga Wadnaha ee Maraykanka (American Heart Association) si aad u heshid macluumaaad.

Ammaanka

Qalabka ammaanka iyo tababarka

1-800-222-1222 (Xarunta Wicistu waxay furan tahay 24/7)

- Haddii qof uu sumoobay, isla markiiba wac. Raac fariimahooda.
- Dhammaan dawooyinka ku rid khaanad qufulan.
- Dhammaan aagaga lagu kaydiyo ama lagu hayo kiimikooyinka guriga ku xidh qufulo ammaan oo ilmaha loogu talogalay—sida hoosta faraxalka, khaanadaha geerashka, iwm.
- Weelka dawooyinka ee faaruqa ah ha u isticaalin alaab ay caruurtu ku ciyaraan.





Spring Lake Park - Blaine - Mounds View
1710 County Highway 10
Spring Lake Park, MN 55432
763-786-4436

www.homesafetychallenge.org